

# Ku soobuur Junis

Ku soobuur  
tacabur iyo  
madadaalo kale

Junis waxay  
ku leedahay 180  
naadi Sweden

10,000 carruur  
ah ayaa ka  
tirsan Junis

## Madadaalo Ciidda Ka Badan

Xubin ka noqon Junis oo kaqaybqaado hawlo badan oo madadaalo ah. Qaar kamid ah naadiyada Junis waxay daawadaan filimo, riwaayado, ama waxay hawlo ayey qabtaan. Qaar kale waxay dhigaan masrixiyad, jaas, barnaamij ku shubaan ciyaarahooga (games), ama kaqaybqaataan xoogaa isboorti ah. Ama wax gabi ahaanba ka duwan!

## Tag/aad xerada

Xagaa kasta, Junis waxay u diyaarisaa xeryo iyo hawlo kale in ku dhaw 3,000 oo carruur ah waddanka oo dhan. Ku biir tacabur! Baaskiil ayaad kaxayn kartaa, dabbaalan kartaa, seexan kartaa taandho, la kulmi kartaa saaxiibo cusub, ama samayn karta wax kale ood ka hesho.

## Adigaa go'aamin

Dimuquraaddiyaddu waa muhiim Junis. Carrurta iyo la-taliyayaashu go'aanada way wada qaataan oo qof kastaa aragtidiiisa waa la dhagaystaa. Naadigu wuxuu leeyahay kulan sanadle ah oo sanad walba la qabto, kaasi oo carruurta iyo la-taliyayaashu ay kaqaybqaadan karaan, oo go'aamiyaan kana fekeraan waxa dhici doona sanadka dhediisa.

## Qof kasta wuu kaqaybqaadan karaa

Junis waxay ka dhigan tahay dhammaan carruurta ilaa da'da 15 jirka ah. Halkan waa lagu arkayaa, lagu dhagaysanaya, oo saamayn leedahay. Dhammaan waa la soo dhaweyaa ❤



Haa, waan rabaa inaan noqdo xubin ka tirsan Junis, oo aan helo martiqadyada dhammaan madadaalooyinka aynu isla qaadanno!

Magaca kowaad

Magaca dambe

Cinwaanka

Boost koodhka iyo magaalada

Lambarka taleefanka

Iimeylka

Lambarka aqoonsiga qaranka

Naadiga aad rabto (haddii aad garanayso)

Markaad ku dirto foom, naadiga deegaankaaga ayaa kula soo xiriiri doona.

Macluumaadka waxa loo hayaa iyadoo la raacayo siyaasadda asturnaanta Junis. Waxaad ka heli kartaa shuruudaha dhammaystiran ee haynta macluumaadkaaga khaaska ah halkan junis.se/integritetspolicy

Si aad u xubin  
u noqoto boogo  
junis.se/blimedlem,  
ama buuxi  
foomkan!

Porto  
betalt

B

**FRISVAR**

Junis  
20081621  
110 00 Stockholm

**La-taliyayaasha, kuwaasi oo  
mawqif qaatay**

Hawla Junis waxay kusalaysan yihii dimuquraadiyad, isku duubni, iyo miyirqab. Dhammaan la-taliyayaashu waxay ka qaateen mawqif nolosha miyirqabka. La-taliyayaashu mabda'a ahaan waa qaar ay ka go'an tahay, oo wakhtigooda ku deeqa si ay isbaddal ugu sameeyaan carruurta.

**La-taliyayaal ammaan ah, hawlo ammaan ah**  
La-taliyayaasha Junis waxay helaan tabobarro hoggaaminta ah iyo taageero joogto ah si ay u kobciyaan xirfadahooga hoggaaminta. Wawaanu si firfircoona uga shaqaynaa inaanu siino la-taliyayaasha agab si ay u noqdaan dadka ammaanka ah ee hawlulu u baahan yihii. Waxaad la-taliye ka noqon kartaa Junis marka aad da' ahaan gaarto 15 jir. Wax badan ka akhri halkan junis.se/bliledare

Qof wayn tus  
marka guriga



Junis - waa naadiga 15 jirka  
iyo wixii ka yar. Hawlo ciidda  
ka badan. Tacaburro fara  
badan. Wawaadna ka noqon  
qayb oo aad go'aamin.

**Junis**

**Madadaalo  
carruurta oo  
dhan ah**